



# WEST SEATTLE BRIDGE UPDATES

Winter 2020

## DAYACTIRKA BUUNDADA SARE EE GALBEEDKA SEATTLE

Buundada waxa la filayaa in dib loo furo 2022

ka xirtay Buundada Sare Kacsan ee Galbeedka Seattle dhamaan socodka baabuurta. Bishii Nofember 2020, iyadoo la shaqeyneysa SDOT iyo bulshada, Meeyar Durkan waxey gaartay go'aan lagu dayactirayo buundada. Buundada waxa la filayaa in dib loo furo 2020.

## QORSHE QORAALKA SOUTH PARK HOME ZONE

Ku dhiibo fakarkaaga sahanan gaaban

Bishii Juulaay 2020, waxanu bilownay howsha lagu magacaabo Reconnect West Seattle, oo ah howl lagu taageerayo xaafadaha ay saameysay xiritaankii Buundada Sare ee Galbeedka Seattle iyo soo celinta safar tayo leh oo dhex qaada Duwamish. Dadaalka ku jeeda Reconnect West Seattle iyo la xiriirka bulshada, waxanu bilownay inaan la shaqeyno bulshada South Park bishii Agosto si qorshe loogu sameeyo barnaamijka South Park Home Zone.

Home Zone wuxuu ku lug leeyahay xaafadda oo dhan oo ka wada shaqeyneysa in mudnaanta la siiyo hagaajin lagu sameeyo qaboojinta socodka baabuurta iyo sare u qaadidda nolosha iyo dhaq-dhaqaaqa nolosha xaafadda. Waxan diyaarinnay qorshe qoraal ah, oo laga arki karo liiska mashruuca iyo maababka hoose kaasi oo ku saleysan la xiriirkeeni bulshada South Park ee labada socod aanu kula sameynay xaafadda iyo seddex kulamo bulsho.

Waxan aad u jeclaan lahaa inaan helno fakarkaaga adigoo eegaya qorshaha qoraalka ah iyo inaad noo sheegto haddii ay jiraan wax ka maqan ama u baahan in laga hagaajiyo inta qorshaha aan la dhammeystirin. Ra'yigaaga aad ku dhiibato sahanan gaaban wuxuu nagu caawini doonaa inaan hubinno in mashaariicda loo kala mudnaan siiyo qaab ka yeelaya South Park meel ammaan ah iyo iney ahaato xaafad dadka lugeeya saaxiib la ah.

Sahankani wuxuu furan yahay ilaa Janaayo 18, wuxuuna ku diyaarsan yahay luqadaha soo socda: English, Spanish, Somali, Khmer iyo Vietnamese oo laga heli karo likigan soo socda iyo hoosta:

- Survey in English: [survey.participate.online/s3/South-Park-Neighborhood-Survey](https://survey.participate.online/s3/South-Park-Neighborhood-Survey)
- Encuesta en español: [survey.participate.online/s3/South-Park-Neighborhood-Survey-Spanish](https://survey.participate.online/s3/South-Park-Neighborhood-Survey-Spanish)
- Saadaasha Somali: [survey.participate.online/s3/South-Park-Neighborhood-Survey-Somali](https://survey.participate.online/s3/South-Park-Neighborhood-Survey-Somali)
- ការសុំឯកសារព័ត៌មានខ្មែរ [survey.participate.online/s3/South-Park-Neighborhood-Survey-Khmer](https://survey.participate.online/s3/South-Park-Neighborhood-Survey-Khmer)
- Khảo sát bằng tiếng Việt [survey.participate.online/s3/South-Park-Neighborhood-Survey-Vietnamese](https://survey.participate.online/s3/South-Park-Neighborhood-Survey-Vietnamese)



Si loo ogaato sida buundadu uga fal-celiso xaaladaha kala duwan, shaqaalahu waxey isticmaalayeen nidaam si caqli badan wax ku eega oo ku rakiban dhinaca buundadu ku leedahay dil-dilaacyada.

**Photo Credit:** Tim Durkan

Sahanku wuxuu sidoo kale diyaar ku yahay webseydka mashruuca oo ah:

**[www.seattle.gov/reconnectwestseattle](http://www.seattle.gov/reconnectwestseattle).**

Si aad u codsato sahan luqado kale ku qoran, nagala soo xiriir [WestSeattleBridge@seattle.gov](mailto:WestSeattleBridge@seattle.gov) or 206-400-7511.

Si aad u ogaato sida shaqadeena ku jeeda Reconnect West Seattle iyo warar dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca xaafaddaada, fadlan booqo webseydkeena:

**[www.seattle.gov/reconnectwestseattle](http://www.seattle.gov/reconnectwestseattle).**


**Translation and Interpretation services available upon request: (206) 400-7511.**

**Dịch và thông dịch sẵn sàng nếu có sự yêu cầu (206) 400-7511.**

**Servicios de traducción e interpretación disponibles bajo petición (206) 400-7511.**

**Adeega Turjubaanka waxaa lagu heli karaa codsasho" (206) 400-7511.**

# MAABKA MASHAARIICDA OO DHAN



## FURAHA

- 1** South Park Concord Home Zone
- 2** South Park NorthEast Home Zone
- 3** Hagaajinta Goobaha Socodka ee S Cloverdale St
- 4** Hagaajinnada Wadiiqada 8th Ave S
- 5** Hagaajinta Waddooyinka Jaran-jarta ee 10th Ave S iyo 12th Ave S
- 6** Hagaajinta Waddada Socodka ee S Elm Grove St
- 7** Naqshadeynta isku xirka Westwood/Highland Park

- Xuduudaha Home Zone
- Wejiga 1aad ee Xaafadda Jid-cagaaranka iyo Waddada Caafimaad Ku Joog

- Wejiga 2aad Xaafadda Jid-cagaaranka iyo Waddada Caafimaad Ku Joog
- Wejiga 3aad Xaafadda Jid-cagaaranka iyo Waddada Caafimaad Ku Joog
- Hagaajinta Isku Xiranka Marinka Dusha iyo Wadiiqada 8th Ave S
- Hagaajinno Goobaha Socodka
- Hagaajinta Wadiiqada South Park-Georgetown
- Nalalka Waddo-Goynta ee Deg-degta
- Did u habeyn Goobaha Socodka
- Qiimeynta Seenyaalaha ee 14th Ave S iyo S Dallas St

- Hagaajinta waddada jaran-jarta ah
- Burooyinka dhaqsiyaha (Speed humps): Laba burood oo dhaqsiyaha ah ayaa lagu soo kordhin doonaa balooga bari-galbeed iyo hal buro dhaqsiyaha ah oo lagu kordhinayo balooga wuqooyi-koonfur.
- Abuurista geedo cusub

#	Mashruuc	Nooca mashruuca	Qiimaha
1	South Park Concord Home Zone	Stay Healthy Streets*, marshabeediyo hore u diyaarsan, geedo	\$200-400k
2	South Park Northeast Home Zone	Stay Healthy Streets*, burooyin dhaqsida, yareynta socodka	\$200-400k
3	S Cloverdale St Improvements (7th Ave S to 8th Ave S)	Ballaarinta waddo-dhinaceeyada, hagaajinta lugeynta	\$500k**
4	8th Ave S Trail Improvements	Abuurista iyo jarista cawska, beddelidda laamiga, hagaajinta goynta jidka	\$100-200k
5	10th Ave S and 12th Ave S Stairway improvements	Iftiiminta, laamiyeynta, abuurista iyo gaagaabinta cawska, beddelaadda waddooyinka jaranjarta ah	\$100-300k**
6	S Elmgrove St iyo Port Collaboration	Waddo dhinaceedyo shameeysan oo hore loo diyaariyey, dhir gelin, laami beddelaad	\$100-200k
7	Designing connection ilaa Westwood/ Highland Park	Hagaajin goobaha ku lugeynta	\$100k

**\*Waddooyinka Caafimaad ku Noolow (Stay Healthy Streets) waa barnaamij SDOT ah oo baabuurta ka xiray waddooyinka gudaha iney dhex maraan laakinse u oggol dadka lugeynaya iney ku socdaan, is dab-joog ah, iyo baaskiil ku wadashada waddooyinka.**

**\*\*Waxa ka mida maalgelin ka baxsan SDOT ee barnaamijka Reconnect West Seattle.**

## SAFARKAAGU WUXUU SAAMEYNAYAA QOF KASTA

Iyadoo buundadu sii xirnaan doonto, qof kasta waxa looga baahan doonaa iney kaalinteeda qaadato si loo yareeyo saameynta safarkooda. Haddii ay suurto gal tahay, fadlan raadso meelo kale si aad u gaarto halka aad u socoto:

- [Socod, wadis, baaskiil, ama mooto](#)
- [Raac bas ama qaado taksiga biyaha](#)
- [Gaari dad la raac ama la wadaag raacitaan](#)
- [Deegaanka joog kana adeego](#)

Kala doorashooyinkaasi waxey idinka caawini kartaa iney yareeyo ciriiriga waxeyna difaaci kartaa caafimaadka dadka ku nool bulshada ay saameysay.

Fikrado iyo ilo ku saabsan sidii meelaha lagu mari lahaa waqtiga xirnaanshaha, booqo:

[www.seattle.gov/reconnectwestseattle](http://www.seattle.gov/reconnectwestseattle).

## NALA SOO XIRIIR

Waxa inaga go'an inaan idinla socodsiino wararka ku saabsan horumarka iyo guulaha waaweyn inagoo sii dayactireyna buundada. Waxan si joogto ah ugu baahan nahay ra'yigiina ah sidii loo hagaajin lahaa socodka iyo ammaanka.

- [Nagu martiqaad inaan kula kulanno si muuqaal ah kooxdaada ama hey'addaada](#)
- [Noo soo iimeel garee ama wac](#) si aad noola wadaagto fakarkaaga
- [Booqo webseydkeena](#) si aad isugu qorto helitaanka warbixinno toddobaadle ah

**Teleefon:** (206) 400-7511

**limeel:** [WestSeattleBridge@seattle.gov](mailto:WestSeattleBridge@seattle.gov)

[www.seattle.gov/WestSeattleBridge](http://www.seattle.gov/WestSeattleBridge)

## GANAAAX BUUNDADA HOOSE WAXEY BILAABANAYAA 2021

Buundada hoose waxa ay imika u furan tahay baabuurta gaarka ah kaliya habeenkii (ka bilaabata 9 fiidnimo ilaa 5ta subaxnimo). Dhammaan waqtiyada kale waxa kaliya ay u furan tahay baabuurta gurmada deg-degga, xamuullada culus, iyo basaska.

Laga bilaabo Janaayo 2021, baabuurta gaarka ah ee ku dul socda buundada inta u dhaxeysa 5ta subax iyo 9ka habeenimo waxa lagu ganaaxi doonaa 75 doolar. Fadlan ku talo gal qorshe. Wax badan ka ogow: [seattle.gov/transportation/LowBridge](http://seattle.gov/transportation/LowBridge).

## HAGAAJINTA WADDADA WEST MARGINAL WAY SW

Xiriirro iyo wargelin ayaa bilaabanaya bishan oo ku saabsan sidii waddada West Marginal Way looga dhigi lahaa mid nabad ah iyo mid u furan qof kasta. Haddii aad jeceshahay inaad ogaato wax intaa ka badan iyo inaad dhiibato fikir, fadlan booqo:

[www.seattle.gov/reconnectwestseattle](http://www.seattle.gov/reconnectwestseattle).



*\*Waddooyinka Caafimaad ku Noolow (Stay Healthy Streets) waa barnaamij SDOT ah oo ka xiray baabuurta waddooyinka gudaha iney dhex maraan laakinse u oggol dadka lugeynaya iney ku socdaan, is dab-joog ah, iyo baaskiil ku wadashada waddooyinka.*

**Photo Credit:** SDOT

## SAADAALINTA XAAFADDA SOUTH PARK

1. Ma dareemeysaa in qoraalka qorshe iney ka maqan yihiin wax muhiim u ah ammaanka dadka lugeynaya ama arrimo ammaanka ah oo mudnaan u leh u leh xaafadda South Park? (sanduuqa sax ku qor)

- Haa
- Maya

1 a. Ma jiraan wax aad rabto inaad aragto in lagu daro ama laga bixiyo qorshaha? (su'aal furan-xiran).

1 b. Ma daneyneysaa inaad ra'yigaaga kala hadasho wakill SDOT? Haddii ay haa tahey, fadlan soo qor magacaaga, numbarka telefoonka, iyo/ama iimeelkaada.

Magac:

Telefoon Lambar:

Iimeel:

Luqadda aad ku hadasho:

2. Muxuu yahay xiriirka lagama maarmaanka ah ee aad la leedahay xaafaddan?

- Halkan ayan ku noolahay
- Halkan ayan ka shaqeeyaa
- Halkan iskuul ayan u imaadaa
- Halkan waan ku cibaadeystaa
- Halkan adeegyo ayan ka helaa
- Halkan ganacsi ayan ku leeyahay
- Halkan folinteer ayan ka ahay
- Wax kale:

3. Mashruucee kugu dhow oo ku ag mooshahay? (su'aal ikhtiyaari ah)

- 1. South Park Concord Home Zone
- 2. South Park NE Home Zone
- 3. S Cloverdale St improvements (7th Ave S to 8th Ave S)
- 4. 8th Ave S Trail Improvements
- 10th Ave S and 12th Ave S Stairway improvements
- S Elmgrove St and Port Collaboration
- 7. Designing connection to Westwood/Highland Park

4. Ma ku ag nooshahay ama ka shaqeysaa Dallas Ave S?

- Haa
- Maya

4a. Hey'adda Seattle Department of Transportation waxey ka fakareysaa ka sameynta kurtanka yar ee yareeya dhaqsiyaha (speed humps) Dallas Ave S kaasi oo qeyb ka ah South Park Home Zone. In kastoo kurtanka yar uu waxtar u yahay yareynta dhaqsiyaha socodka baabuurta, waxey sidoo kale ku keeni karaan dhawaqyo dheeraad ah aagga iyadoo gaadiidka weyn iyo baabuurta kale dul mari doonaan. Nala soo socodsii haddaad u maleyso in kuusanka xawaaraha (speed humps) ku habboon yahay ujeedooyinka iyo mudnaanta xaafaddaada?

5. Ma waxaad isku taqaanaa inaad tahay: (xariiq dhammaan inta ku khuseysa)

- Hindi Ameerikaan ama Alaskan Asal ah
- Aasiyaan
- Madow ama Afrikaan Ameerikaan
- Hisbaanik ama Laatiino/a
- Asal Haawaay ama Jasiiradda Baasifik
- Caddaan
- Wax kale (fadlan sheeg):

7. Sideed ku maqashay saadaalintan? (xariiq dhammaan inta khuseysa)

- Warsidaha South Park Roots
- Warsidaha ama webseedka Seattle Department of Transportation
- Baraha Bulshada
- Saaxiib ama xubin qoyska ah
- Iskuul, hey'ad, ama koox bulshada ah:
- Wax kale:

6. Da'daadu waa imisa?

- 11-17
- 18-24
- 25-30
- 31-35
- 36-40
- 41-50
- 51-64
- 65-74
- 75+

8. Haddii aad dooneyso in lagugu daro liiska boostada ee mashruuca, fadlan hoos ku qor cinwaanka iimeelkaaga:

Waad ku mahadsan tahay fakar dhiibashadaada. Fadlan booqo webseydka Buundada West Seattle Bridge warar dheeri ah: [www.seattle.gov/reconnectwestseattle](http://www.seattle.gov/reconnectwestseattle).

### SOO CELINTA SAADAALINTEYDA:

Si aad u soo celiso saadaashaada oo buuxda, waxad sameyn karaa mid ka mida waxyaabaha soo socdado:

U soo iimeel garee koobi iskaan ah oo ka mida Saadaalinta: [WestSeattleBridge@seattle.gov](mailto:WestSeattleBridge@seattle.gov)

Goobaha la dhigto:

- Resistencia Coffee – 1249 S Cloverdale St, Seattle, WA 98108
- South Park Community Center – 8319 8<sup>th</sup> Ave S, Seattle, WA 98108

U soo dir City Hall: PO Box 94649, Seattle, WA, 98124-4649



**Seattle**  
Department of  
Transportation